

# Baaritaanka Dhuunta Throat Culture (Somali)

Canugaaga wuxuu marayaa baaritaanka dhuunta sababtoo ah wuxuu muujinayaan astaamaha bakteeriyyada dhuunta. Strep, waxaa laga soo gaabiyay *Streptococcus*, waa jeermis waxyeelo leh (oo ah bakteeriya). Haddii aanan la daaweyn, waxay waxyeeli karaan jirka. Waxaa jiro 2 nooc baaritaano ah ee la adeegsado si loo ogado haddii canugaaga uu qabo bakteeriyyada dhuunta.

- Baaritaanka bakteeriyyada degdega (baaritaanka antiijenka degdega ah)
- Baaritaanka dhuunta

## Astaamaha iyo Calaamadaha Bakteeriyyada Dhuunta

Canuga qabo bakteeriyyada dhuunta wuxuu lahaan karaa aastaamaha qaar ama dhammaan astaamaha:

- Dhuun gaduudan, xanuun ah
- Baro cad ee gadaasha dhuunta, qanjirada, ama carabka
- Carabka gaduud cadaanka ah
- Baro yar oo cad ee afkaaga dushiisa
- Nabaro gaduudan, sida maruubka jirka (jirada bakteeriyyaha)
- Calool xanuun, oomateed la'aan, lalabo, ama matag – gaar ahaan carruurtaada yaryar
- Qandho
- Qanjirada qoorta bararsan, adag
- Dhibaatada liqitaanka
- Madax xanuun, wareer
- Jiifida si ka badan caadi ahaanta

## Maxaa Dhaco

Labada baaritaanba wuxuu adeegsadaa isla nooca suufka muunada. Canugaaga wuxuu u wareejinayaan madaxiisa gadaal, oo furaan afkooda, oo dhahaa "ahh." Dhaqtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaad ayaa ku burashayo 1 ama 2 jeer suufka muunada gadaasha dhuunta. Canugaaga waxaa laga yaabaa inuu hungooda waxyar.

- Baaritaanka bakteeriyaaha dhuunta degdega ah (baaritaanka antijeenka degdega) – Waxay qaadataa illaa 30 daqiqo oo lagu helo natijjooyinka baaritaanka bakteeriyaaha dhuunta degdega. Waad joogeysaa illaa aad ka heshid baaritaanka.
- Baaritaanka dhuunta – Suufka muunada ayaa loogu diraa sheybaarka baaritaan. Waxay qaadataa 1 illaa 2 maalmood inaad ku heshid baaritaanada.
- Haddii canugaaga uu sameeyay baaritaanka degdega ee bakteeriyyada marhore, isla muunadaas ayaa loo diri karaa sheybaarka si loo sameeyo baaritaanka dhuunta. Canugaaga uma baahanayo in laga qaado muunada markale. Sheybaarka ayaa ogeysiinaayo dhaqtarka canugaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka, kaas oo kadib ku ogyesiyo natijjooyinka.

## Natijjooyinka Baaritaanka

- Baaritaanka **xanuunka laaga helay** waxaa loola jeedaa in canugaaga qabo bakteeriyyada dhuunka.
  - Daawada qalajiyaha waa in la bilaabaa isla markaas. Daaweynta hore way ka hortagi kartaa waxyeelada jirka.
  - Waa muhiim in dhaqtarka canugaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka garanayo sida lagula xiriiro taleefon ahaan.
- Baaritaanka **xanuunka laaga waayay** waxaa loola jeedaa in bakteeriyyada dhuunta uu sababay fayras. Daawada qalajiyaha ma caawiso caabuqyada fayraska.

## Sida loo Illaaliyo Dadka Kale

- Ka illaali canugaaga dadka kale sida badan ee suurtogalka ah oo 12 saacadood kadib markii ay bilaabaan qaadashada qalajiyaha. Bakteeriyyada waa mid faafa (wuxuu ku faafi karaa dadka kale).
- Qof walba waa inay ku dhaqaan gacmahooda inta badan saabuun iyo biyo ama isticmaal jeermisdilaha gacmaha. Gacmo dhaqida wanaagsan waxay ka hortagtaa faafida caabuqa.
- Qoyaanka ka imiado sanka iyo afka canugaaga wuu faafaa. Ha daboosho canugaaga afkiisa markii ay qufacayaan ama hindhisayaan. Iska tuura istiraashooyinka islamarkaas kadib markii la isticmaalo oo ha dhaqdaan gacmaha.
- Ha wadaagin koobabka cabitaanka ama maacuunta cunista.
- U sheeg kalkaalisada dugsiga iyo macalinka canugaaga in canugaaga qabo bakteeriyyada dhuun xanuunka. Dugsiga wuxuu u baahanyahay inuu ogaado si markaas waaladiinta kale loogu sheego inay ka dhowraan carruurtooda aastaamaha.
- Haddii qof ku jiro qoyska uu ku dhaco bakteeriyyada dhuunta, waa inuu baaraa dhaqtarkooda ama bixiyaha daryeelka caafimaadka si ay u arkaan haddii ay qabaan bakteeriyyaha dhuunta.